

Macluumaad ku saabsan Boonaska Bilaabidda Dugsiga oo la siinayo waalidiinta ardayda Bareebka iyo Sannadka 7aad oo lagu qori doono wargeyska kowaad ee 2010

Lacagta Boonaska Bilaabidda Dugsiga (SSB) waxaa la soo saaray 2006 si looga caawiyo waalidiinta/weliyada ardayda Bareebka iyo Sannadka 7aad si ay u bixiyaan kharashyada la xiriirta bilaabidda dugsi-dhigashada dugsiga hoose iyo dugsiga sare.

Boonaska SSB maahan mid dhakhliga qofka loo eego wax xiriir ahna lama leh Centrelink.

Arday kasta oo ku qoran marka kowaad Bareebka ama Sannadka 7aad ee Teeramka 1aad wuxuu xaq-u-leeyahay boonaskaas. Lacagta Boonaska Bilaabidda Dugsiga way ka baxsan tahay waana ka dheeraad Gunnada Kabidda Waxbarashada (Education Maintenance Allowance).

Waalidiinta/weliyada xaq-u-leh uma baahna inay soo sameeyaan codsi.

Lacagta boonaska oo dhan \$300 ayaa la bixin doonaa ayadoo ah qaabka foorjar lacag caddaan ah oo laga helaayo dugsiga ka dib marka la dhammaystiro habka dugsi-ku-qoridda oo ku aaddan dhammaadka 2009, ee ardayda bilaabaysa Bareebka & Sannadka 7aad ee 2010.

Foorjarka waxaa lagu soo qorayaa oo qaadanaya bixiyaha daryeelka kowaad/weliga sharciga ah oo ku qoran faahfaahinta foomka dugsi-ku-qoridda ardayga oo uu hayo dugsigu.

Foorjarka waxaa laga sarifan karaa goob kasta ee boostada Australia oo ay ku taal calaamadda Bank@Post laga bilaabo 11ka Janaayo 2010 ayadoo la keensanayo aqoonsiga sawirka leh.

Fadlan hubi inaad dugsiga siiso magacaaga sharciga ah oo dhan si laguugu sameeyo foorjarka lacagta kaas oo la mid ah aqoonsigaaga sawirka leh.

Haddii magacaaga foorjarka ku qoran uu khaldan yahay, weydii dugsigaagu inuu ku siiyo foorjar kale oo uu ku qoran yahay magacaaga sharciga ah oo saxsan.

Dugsigaagu wuxuu ku siin doonaa foorjarka Boonaska Bilaabidda Dugsiga. Macluumaadka waxaa laga heli karaa website-ka Wasaaradda Waxbarashada oo ah

www.education.vic.gov.au/aboutschool/lifeatschool/financialservices.htm.

Kala xiriir ka Wasaaradda Waxbarashada Adeegga Macluumaadka iyo Meel-u-diridda 1800 809 834 qaybta 6 haddii aad u baahato macluumaad dheeraad ah.